



Buugga Codbixiyaha oo Soomaali ah Doorashada Xisbiga ee Gobolka Oregon Maajo 19, 2026

War-saxaafadeed

Kani waa Buugga Codbixiyaha Rasmiga ah ee Doorashada Xisbiga ee 2026. Waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso inaad codkaaga ku dhiibato warqadaha codbixinta boostada lagu diro. Warqadaha codbixinta ayaa boostada loogu diri doonaa codbixiyaasha diiwaangashan laga bilaabo Abriil 29-keeda.

Waxyaabaha ku jira buugga waxaa ka mid ah waqtiyada kama dambaysta ah ee doorashada, macluumaadka diiwaangelinta codbixiyaha, xuquuqdaada adigoo ah codbixiye ku dhaqan gobolka Oregon, warbixinnada musharixiinta, iyo macluumaadka ku saabsan aftiyada.

Tobias Read
Xoghayaha Gobolka Oregon

vote!



Oregon Secretary of State
Tobias Read



Cod Bixiyayaasha gobolka Oregon ee qiimaha iyo qaayaha leh,

Laba boqol iyo konton sano la soo dhaafay, 13 gumeysi oo Mareykan ah ayaa u dagaallamay xaqa ay u leeyihiin inay doortaan hoggaamiyayaashooda. Tan iyo markaas, waxaan ka shaqeynaynay dhisidda qaran “xorriyadda iyo caddaaladda loo dhanyahay” isla markaana ka mug weyn keliya in loo adeegsado hal-ku-dheg oo keliya, annagoo ballaarinay xaqa codbixinta si uu u gaaro dhammaan muwaadiniinta. Mar kasta oo aan ku darno muwaadiniin badan geeddi-socodka, dalkeenna waxa uu hal tallaabo u sii dhawaanayey gaarista hal-kudhigiisa ah in la helo midnimo waarta. Marka aad dhiibato codkaaga, waxaad maamuusaysaa dhaxalka weyn ee Maraykanka. Waxay xaqiijinaysaa xuquuqdaada aad u leedahay inaad go’aamiso mustaqbalkeena aan u wada dhannahay isla markaana aad dowladdada kula xisaabtanto. **Codkaaga waa awooddaada, mar haddii aad ku dhaqantahay gobolka Oregon isla markaana aad tahay muwaadin ameerikaan ah. Waad ku mahadsan tahay isticmaalkeeda.**

In laga codeeyo gobolka Oregon waa mid sahlan isla markaana badqab leh. Kuwaan soo socda waa siyaabaha aad ku xaqiijin karto in codkaaga la xisaabo:

- U buuxi warqaddaada codbixinta si sax ah: si taxaddar leh u akhri tilmaamaha oo si dhammaystiran u buuxi dookhaaga.
- Saxiix baqshada warqadda codbixinta: saxiixaaga waa inuu shabahaan kan aad isticmaashay xiliga aad isku diiwaan gelisay inaad codeyso mise DMV.
- Soo celi warqaddaada codbixinta adigoo ilaalinaya wakhti: boosto ku soo dir, mise si ka fiican isticmaal sanduuqa codbixinta oo amaan ah isla markaana macmal ah oo laga heli karo (oregonvotes.gov/dropbox). Waxaad sidoo kale si shaqsi ah codkaaga uga dhiiban kartaa xafiiska xoghaynta degmadaada. Waraqaha codbixinta waa inay muujisaa in boostada lagu qabtay 8 PM Maajo 19, 2026.

WAXYAABAHA KA SOO CUSBOONADAY 2026 Sababo la xiriira dib u dhac ku yimid USPS, haddii aadan boostada ku soo dirin warqadda codbixintaada ugu yaraan 7 maalmood ka hor Maalinta Doorashada, isticmaal inaad ku riddo sanduuqa codbixinta ama si toos ah u tag xafiiska boostada oo ka codso in lagu taarikheyo ka hor intaadan gelin sanduuqa ururinta.

- La soco warqadaada codbixinta: eeg marka lagu soo diro isla markaana soo gaarto gacanta karraaniga degmadaada, adigoo booqanaya oregonvotes.gov/myvote.



Oregon Secretary of State
Elections Division

Buug-yaraha Codbixiyeyaasha ee Oregon oo ku qoran Af-Soomaali

Oo mar haddii aad dhiibato codkaaga, waad ku aamini kartaa sistamka inuu xisaabo codkaaga Doorashooyinka ka dhaca gobolka Oregon waa mid ka mid ah kuwa ugu amaanka iyo hufnaanta sugan ee laga sameeyo dalka. Liiska dadka codbixiyaasha waxaa loo cusboonaysiyaa si maalinle ah Mashiinnada tiraya codadka waa kuwo la ansixiyey, qofulan, isla markaana intarneetka ku xirnayn. Degmooyinka waxay si baahsan u tijaabiyaan sistamyada tirinta codadka ka hor iyo ka dib doorasho walba. Warqad codbixineed walba waxay leedahay lambar aqoonsi oo gaar u ah oo saxiix walbana waa la xaqiijiyey. Haddii mar walba la isweydiyo su'aalo ku aadan niyad-samida cod-bixiyeyaasha, koox sameeyso qiimayn oo tababaran ee ka socda xisbiyada siyaasadda ee kala duwan waa inay ku heshiiyaan natiijada. Doorashada ka dib, warqaddaha codbixinta waa la kaydiyaa waxaana xisaabiya degmooyinka. Taasina waa waxa isla xisaabtanku uu ku dhisanyahay, wwaxayna qayb ka tahay tallaabo kasta oo geeddi-socodkeenna ah.

Haddii qabto su'aalo mise abid kugu soo dhacday oo ku aadan doorashooyinka gobolka Oregon, ku xirnow ilo-xogeedyada rasmiga ah: xafiiska Xoghayaha Gobolka (oregonvotes.gov) ama karaaniga Degmadaada (oregonvotes.gov/counties).

Sannadkan, codkaaga waa ka muhiimsan yahay abid sidaad ku ogayd. Garab istaag oo u codee dadka ku dhaqan gobolka Oregon ee dalka Maraykanka ee aad ku kalsoontahay. Sharaf iyo maamuus u muujiyo jilka u soo halgammay xuquuqdan. Qorsheyso inaad codeyso. Codkaaga dhiibo. Isticmaal awoodaada.

Wada-shaqayn wacan,



Tobias Read

Xoghayaha Gobolka Oregon (Oregon Secretary of State)



Iskaan-garee QR Koodhka si aad u booqato barta oregonvotes.gov

Xoghayaha Gobolka Oregon (Oregon Secretary of State): Waaxda Doorashooyinka (Elections Division) | 255 Capitol St NE, Suite 126 Salem, Oregon 97310 | (503) 986-1518

Turjumaadda Buugga Codbixiyaha Ka dhigista Nidaamka Codbixinta Mid u fudud Cid walba

ORS 251.026, ORS 251.167, ORS 251.170, ORS 251.173 & ORS 251.315

Sannadka 2021, Golaha Sharci-dejinta ee gobolka Oregon wuxuu ansixiyay Sharciga Helitaanka Adeegga Luqadda ay ku hadlaan Codbixiyeyaasha (HB 3021) kaasoo u xilsaaraya Xoghayaha Gobolka inuu u turjumo qaybo ka mid ah buugga codbixiyaha gobolka iyo degmooyinka luqadaha ugu badan ee Oregon looga hadlo.

Sharcigu wuxuu ujeedkiisu yahay in laga saaro caqabadaha ku hor gudban codbixinta dadka aan si buuxda ugu hadlin Af-Ingiriiska.

Si looga miro-dhaliyo dadaalkan, Guddiga La-tashiga Tarjumaadda ayaa la aasaasay. Guddigu wuxuu ka kooban yahay xubno bulsho oo iskaa wax u qabso ah kuwaas oo matala kala duwanaanshaha qowmiyadeed, luqadeed, iyo dhaqameed ee codbixiyeyaasha ku dhaqan gobolka Oregon. Xubnaha guddigu waxay hubiyaan in turjumaadaha tayada sare leh ay sax yihiin isla markaana ay xambaarsanyihiin dulucda iyo macnaha guud ee luuqada laga soo tarjumay si waafaqsan dhaqanka.

Qaybo ka mid ah Buugga Codbixiyaha Gobolka ayaa la heli karaa iyadoo ku qorantahay Af-Carabi, Af-Shiinees Fudud iyo mid Dhaqameed, Af-Farsi, Af-Faransiis, Af-lu Mien, Af-Jabaniis, Af-Khmer, Af-Kuuriyaan, Af- Marshallese, Af-Nebaali, Af-Ruush, Af-Soomaali, Af-Isbaanish, Af-Tagalog, Af-Thai, Af-Yukrayn iyo Af-Fiitnaamays.

Si u ogaato wax badan oo ku saabsan Gudiga Talo Bixinta Turjumaadda, fadlan booqo [Oregon.gov/languages](https://oregon.gov/languages)



Wixii su'aalo ah oo ku saabsan:

- isku diiwaangelinta codbixinta
- wax ka beddelista isdiiwaangelintaada
- doorashooyinka iyo codbixinta
- buuxinta warqaddaada codbixinta
- soo celinta warqaddaada codbixinta
- warqadda codbixinta dadka maqan
- warqadda codbixinta ee Beddelka ah
- shuruudaha saxiixda



La xidhiidh Xafiiska [Doorashooyinka Degmadaada:](#)



Taariikhda Fiiraha gaarka ah u baahan

→ Tallaado, Abriil 28

Maalinta ugu dambaysa ee la isku diiwaangelin karo in cod la bixiyo ama lagu beddeli karo xubinimada xisbi siyaasadeed ee doorashadan.



→ Arbaco, Abriil 29

Maalinta ugu horreysa ee degmooyinka ay bilaabaya inay boostada ku soo diraan warqadaha codbixinta.

→ Tallaado, Maajo 19

Maalinta Doorashada

Maalinta ugu dambaysa ee aad soo celin karto warqadaada codbixinta

Haddii aad warqadaada codbixinta ku dirto boostada, waa qasab inay lahaato tiimbare/shaabbad USPS oo ku qoran 8 pm kuna aadan Maalinta Doorashada. Mise ku soo celi warqadaada codbixinta sanduuq lagu bixiyo codka oo rasmi ah ka hor 8 pm maalinta doorashada.



[Oregonvotes.gov/myvote](https://oregonvotes.gov/myvote)

Adeegso aaladdan onlaynka lagu isticmaali karo si aad u hubiso ama wax uga beddesho marxaaladda isdiiwaangelintaada isla markaana aad ula socoto warqadaada codbixinta.





Waa sharci darro in:

- aad saxiixdo boqshada lagu celinayo warqadda codbixinta oo taada ahayn
- la codeeyo wax ka badan hal mar xiliga doorashada mise la bixiyo cod khiyaano ku saleysan
- aad codeeyso haddii uu sharciga kuu banaynin
- aad ku qalqaaliso cod bixiye kale inuu u codeeyo qaab gaar ah
- iibiyo, cid u soo bandhigtid inaad ka iibiso, laga gato, mise cid kale u soo bandhigto inaad ka iibsato warqadda codbixinta oo uu iska leeyahay codbixiye kale.
- la hor istaago albaabka dhisme oo ay ku taal meel codbixineed ama goob rasmi ah oo warqadaha codbixinta lagu rido
- la haleeyo, meesha laga saaro, la beddelo, ama la dilaaciyo warqadda codbixinta oo uu iska leeyahay codbixiye kale, ogeysiis doorasho oo la dhejiyay, ama qalabka doorashada ama agabyada
- aad isku daydo inaad ururiso codadka la bixiyey haddii aad u jirto masaafa dhan 100 dhudhun goobta rasmiga ah ee codbixinta
- sameyso meel codka lagu rido adiga oo aan muujinin calaamad ku qoran orahda “Not An Official Ballot Dropsite” (“Ma ahan Meel Rasmi ah oo Laga codeeyo”).

Liistigan ma aha mid dhammaystiran. Baalmarista shuruucda iyo sharciyada doorashada gobolka Oregon waxaa lagu mutaysan karaa ciqaab madani ah iyo/ama dambi.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cod ka bixinta gobolka Oregon ama haddii aad u malaynayso in xuquuqdaada codbixiye ahaan la jebiyey fadlan tiigso



oregonvotes.gov



1 866 673 8683
se habla español

TTY

1 800 735 2900
kuwa qaba baahiyaha maqalka



Ogow Xuquuqdaada – Badqabka Goobta codka lagu rido

Xuquuqdaada adigoo ah Codbixiye gobolka Oregon ku dhaqan waxaa ka mid ah:

- xaqa aad u leedahay inaad si xor ah u isticmaasho sanduuqyada rasmiga ah ee codbixinta iyo xafiisyada doorashada
- xuquuda aad u leedahay inaad codkaaga aad ka dhigato mid asturan
- xuquuqda aad u leedahay inaad u codeyso si aan lahayn handadaad mise cagajuglayn

Handadaada codbixiyaha lagu sameeyo waxaa ka mid ah:

- **Su'aalo gardarro ah ama ka xanaajin ah** oo salka ku haaya inaad u qalanto inaad codeyso oo looga danleeyahay in lagu duudsiyo xuquuqdaada codbixinta, lagugu cabsiyo inaad si gaar ah u codeyso ama handadaad lagugu sameeyo inaad codeyso, sida in lagu weydiyo su'aalaha ku saabsan sharcigaaga muwaadinimo, diiwaanka dambiga, degenaanshaha, macluumaad kale oo shakhsi ah, ama su'aalo ku saabsan sida aad u rabto inaad u codeyso.
- **Hadal been abuur ah ama marin-habaabin ah, ama eedeymo oo** ku saabsan khiyaannada codbixiyaasha ama ciqaabo dambiyeed oo la xiriira, kuwaas oo loogu talagalay in lagugu cabsi geliyo inaad ka fogaato codbixinta.
- **Hanjabaado afka ah ama kuwo jirdil ah** – kuwaas oo si cad loo muujiyay ama si dadban loo dhigay – oo looga danleeyahay in lagaa joojiyo codbixinta ama lagugu qasbo inaad u codeyso musharrax ama afti gaar ah.
- **Si ula kac ah u carqaladeynta ama u faragelinta** awooddaada codbixinta.
- **Kormeer gaar ah** oo lagu beegsanayo codbixiyayaal gaar ah ama kooxo codbixiyeyaal ah, sida raacidda ama dabagalka codbixiyeyaasha, nuqul ka qaadista taarikada baabuurta, qaadista muuqaallo ama sawirro, iwm., iyadoo ujeedadu tahay in laga niyad-jebiyo ama laga hor istaago inay codeeyaan.

Si aad u hesho macluumaad sax oo ku aadan codaynta, mise si aad u soo gudbiso handadaada codbixiyaha la xiriir



1 866 673 8683
se habla español

TTY

1 800 735 2900
kuwa qaba baahiyaha maqalka



Su'aalaha Badanaa la Iswaydiyo

Halkeen ka codayn karaa?

Gobalka Oregon, waxaan ka codeynaa qaab boosto ah. Waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa goob walba oo aad doorato.

Haddii aad isku diiwaangelisay inaad codeyso **Abril 28**, warqaddaada codbixinta waxaa boostada lagugu soo diri doonaa inta u dhaxaysa **Abril 29** iyo **Maajo 5**. [Xafiiska doorashooyinka degmadaada](#) wuxuu kugu soo diri doonaa ciwaanka boostada ee ku xusan diiwaankaaga diiwaangelinta codbixiyaha.

Haddii aadan helin warqaddaada codbixinta **Maajo 8**, wac [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#).

Kawaran bal haddii aan meel kale u guuro?

Warqadaha codbixinta laguma soo dirir karo. Si aad u hesho warqaddaada codbixinta, beddel xogtaada diiwaan gelinta codbixiyaha adigoo booqanaya barta oregonvotes.gov/myvote.

Haddii Maalinta Doorashada ay ka harsantahay wax ka yar 5 maalmood, wac [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#) si aad u hesho tilmaamo ku aadan sida aad u heli lahayd warqaddaada codbixinta.

Sideen ku heli karaa warqaddayda codbixinta goor hore?

Haddii aad ka maqnaan doonto gurigaaga Maalinta Doorashada, ka beddel macluumaadkaaga diiwaangelinta codbixiyaha barta oregonvotes.gov/myvote. Si aad u codsato warqadda codbixinta dadka maqan, geli cinwaanka aad ku qaadnayso boostada codbixinta iyo muddada aad halkaas joogi doonto.

Buugga Codbixiyahay miyaa lagu tarjumay luuqado kale?

Haa. Qayb ka mid ah Joornaalka Codbixiyaha ayaa qaab onlayn ah loo heli karaa isagoo ku qoron:

Af-Carabi, Af-Shiinees Fudud iyo mid Dhaqameed, Af-Farsi, Af-Faransiis, Af-lu Mien, Af-Jabaniis, Af-Khmer, Af-Kuuriyaan, Af- Marshallese, Af-Nebaali, Af-Ruush, Af-Soomaali, Af-Isbaanish, Af-Tagalog, Af-Thai, Af-Yukrayn iyo Af-Fiitnaamays.

Turjumaadahaan waxaad ka heli karaa barta onlaynka ah ee:

oregonvotes.gov/voterspamphlet.

Maxaysan igu saamaxaynin inaan u codeeyo musharaxiinta xisbiyada wayn?

Doorashooyinka hordhaca ah ee gobolka Oregon way xidhan yihiin. Waa inaad xubin ka tahay mid ka mid ah labada xisbi ee ugu wayn gobolka Oregon, xisbiga Dimuqraadiga (Democratic) ama Jamhuuriga (Republican), si aad u soo magacawdo musharaxiinta xisbigaas Doorashada Guud. Haddii warqaddaada codbixinta aysan xambaarsanayn musharaxiinta xisbiyada waaweyn, waxa ay ka dhigan tahay inaad isu diiwaangelin inaad u codeeyso xisbi weyn Xisbiyada yaryar iyo musharaxiinta aan xisbi siyaasadeed laheyn waxay ka soo muuqan doonaan warqadda codbixinta Doorashada Guud ee Nofeember, iyadoo ay weheliyaan musharaxiinta xisbiyada waaweyn. Waxaad awoodi doontaa inaad u codeeyso musharax walba oo ku qoran warqaddaada codbixinta Doorashada Guud ee qabsoomi doonto bisha Nofeember.

Sideen u buuxiyaa warqaddayda codbixinta?

Xirmada warqaddaada codbixinta waxaa ku jiri doono tilmaaha sida loo buuxiyo loona soo celiyo warqaddaada codbixinta. [Raac tilmaamaha!](#)

Ka soo qaad haddii warqaddayda codbixinta ay halaysantahay maxaan sameyaa?

Haddii warqaddaada codbixinta lunto, la jeexo, ama waxyeelo loo gaarsiyo hab kaa horistagayso inaad codeeyso, wac [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#) oo waydiso mid kale.

Ma inaan cid walba u codeeyaa?

Maya. Codkaaga waa la tiran doonnaa, xitaa haddii aadan u codeeynin musharax mise afti walbo oo ku xusan warqadda codbixinta.

Sidaan u codeeyey wax maka beddeli karaa?

Haddii warqaddaada codbixinta aad ku soo dirtay boostada mise aad ku riday sanduuqa codbixinta, codkaaga waxba lagama beddeli karo. Balse haddii aad weli heysato warqaddaada codbixinta, fadlan raac tilmaamaha aad heshay marka lagu soo dirayey warqaddaada codbixinta.

Sideen u celiyaa warqaddayda codbixinta?

Waxaad warqaddaada codbixinta ku soo diri kartaa boostada, mana loo baahna tiimbare. Haddii aad warqaddaada codbixinta ku dirto boostada, waa qasab inay lahaato tiimbare/shaabbad USPS oo ku qoran muddo ku aadan mise ka horreyso 8 pm bisha Maajo 19

Mise ku soo celi warqaddaada codbixinta mid ka mid ah xafiiska doorashooyinka degmada mise sanduuqa codka lagu rido ee rasmiga ah Waxaad ka heli kartaa sanduuqa codbixinta kuu dhow, iyadoo weliba kaashata khariirad halkaas kuu tilmaamaysa adigoo booqanaya barta oregonvotes.gov/dropbox mise adigoo la xiriiraya [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#).

[Xafiisyada doorashooyinka degmada](#) waxay furanyihiin Maalinta Doorashada laga bilaabo 7 aroornimo ilaa 8 fiidnimo.

Ma khasab baa in aan isticmaalo baqshada asturayso warqaddayda codbixinta?

Maya. Haddii aad hesho baqshad asturayso warqaddaada codbixinta, khasab kuguma ah inaad isticmaasho, waad isticmaali kartaa haddii aad doorbideyso.

Haddii aadan helin baqshada warqadda codbixinta lagu asturo, degmadaadu waxay ka mid tahay degmooyin badan oo ku soo kordhiyey farsamooyin amni oo dheeraad ah oo ay ansixisay Xafiiska Xoghayaha Gobolka lana imadaan baqshada lagu soo celiyo warqadda codbixinta, sidaas darteedna baqshada lagu asturo warqadda codbixinta looma baahna gabi ahaan.

Miyey tahay inaan saxiixo baqshada aan ku celinayo warqadda codbixinta.

Haa. Saxiixaga qaab loo adeegsado in lagu sugo amaanka isla markaana lagu xaqiijiyo aqoonsigaaga. Adiga unbaa saxiixi kara baqshadaada aad ku soo celinayso warqadda codbixinta. Dukumentiyada Wakiilnimada Sharci looma adeegsan karo codbixinta.

Haddii aadan saxiixi karin magacaaga, la xiriir [xafiiska doorashooyinka ee degmadaada](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Codkaaga kaliya waxaa la xisaabayaa haddii saxiixa ku yaalla baqshada warqadda codbixinta lagu soo celiyo shabahdo saxiixyada ku jira diiwaankaaga diiwaangelinta codbixiyaha.

Haddii saxiixyadaadu aysan is waafaqsanayn mise aad ilowdey inaad saxiixdo baqshada, degmada ayaa kula soo socodsiin doonta. Waxaad lagu siin doonnaa muddo 21 cisho ah ka dib doorashada si aad u caddeyso in adiga aad tahay qofka saxiixay baqshada.

Haddii magacayga uu ku qoran yahay boqshada lagu soo cesho warqadda codbixinta, codkayga ma yahay mid asturan?

Haa. Marka la xaqiijiyo saxiixa, warqaddaada codbixinta waa laga saraa boqshada lagu soo cesho warqadda codbixinta ka hor inta aan la furfurin isla markaana la eegin.

Ma la socon karaa hadba heerka ay mareyso warqaddayda codbixinta?

Haddii aad tahay codbixiye diiwaangashan, waxaa ka dalacan kartaa xogta ka soo koradha warqadda codbixinta barta oregonvotes.gov/myvote. Waad arki kartaa marka warqadda codbixinta la soo diro, la helo, mise haddii loo soo celiyo sababo la xiriira inaysan tillaabada xigta loo qaadi karin.

Gormaa ayey soo shaac baxeysaa natijada doorashada?

Natijoooyinka hore waxaa la shaacin doonaa laga bilaabo **8 PM, 19-ka May**, waxaana sii socon doona in la cusboonaysiiyo inta lagu jiro habeenka doorashada iyo maalmaha ku xiga.

Inta u dhexeysa habeenka doorashada iyo taariikhda la ansixiyo natiijooyinka doorashada, natiijooyinka aan rasmiga ahayn ee la soo dhigay barta oregonvotes.gov way is beddeli doonaan inta tirinta codadka ay socoto.

Natiijooyinka ma noqdaan kuwo kama dambays ah ilaa doorashada la ansixiyo isla markaana nuqulka rasmiga ah ee codadkana la soo bandhigo. Natiijooyinka kama dambaysta ah ee la xaqiijiyay ayaa la heli doonaa 37 maalmood ka dib doorashada.

Miyaan u baahanahay warqadda codbixinta ku meel gaarka ah?

Haddii aan la go'aamin karin in aad u qalanto codbixinta, waxaad xaq u leedahay inaad codsato warqadda codbixinta ku meel gaarka ah

.Si aad u hesho warqadda codbixinta ku meel gaarka ah, si shakhsi ahaan ah u booqo [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#) oo buuxi Foomka Lagu Codsado Warqadda Codbixinta Ku Meel gaarka ah.

Warqaddaada codbixinta ku meel gaarka ah kaliya waa la xisaabi doonaa haddii xaqiijiyo inaad u qalanto codbixin.

Sideen cabasho u soo gudbiyaa?

Haddii aad aaminsan tahay in sharciga doorashada gobolka Oregon la baalmaray, isla markaana aad tahay codbixiye ka diiwaangashan gobolka Oregon, waxaad Waaxda Doorashooyinka (Waaxda Doorashooyinka (Elections Division) | 255 Capitol St NE, Suite 126 Salem, Oregon 97310 | (503) 986-1518) ka codsan kartaa inay baaraan arrintaas. Codsiyada ka imanaya shakhsiyaad aan la aqoonin lama baari doono.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo aad ku soo gudbin kartaa cabasho si Waaxda Doorashooyinka (Elections Division) u baarta bogga sos.oregon.gov/investigation.

Vote!

Natijoooyinka Doorashada



Eeg natijoooyinka aan rasmiga ahayn ee doorashada

laga bilaabo 8 PM, 19-ka Maajo.

Natijoooyinka aan rasmiga ahayn waa la bedbedeli doonaa habeenka doorashada iyo maalmaha xiga.

Inta u dhexeysa habeenka doorashada iyo taariikhda la ansixiyo natijoooyinka doorashada, natijoooyinka aan rasmiga ahayn way is beddeli doonaan inta tirinta codadka ay socoto.

Natijoooyinka kama dambaysta ah waxaa la heli doonaa 25-ka Juun.



results.oregonvotes.gov





Codbixiyaasha Naafada ah

Wixii macluumaad faahfaahsan ah oo ku saabsan cod-bixin qof walba loo fududeyey laxiriir [xafiiska doorashooyinka degmadaada](#).

Waa maxay siyaabaha kala duwan ee aan u codeyn karo?

→ **Warqadda codbixinta oo leh qaab kale oo fudud**

Waxaad warqaddan codbixinta ku calaamadeyn kartaa adigoo isticmaalaya kombiyuutar walba oo leh tiknoolojiyadda caawisa dadka baahiyaha gaarka ah qaba, kadibna daabac oo soo celi. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa tableetyada la adeegsan karo mise kombiyuutarada yaala [xafiiska doorashooyinka degma walba](#).

→ **Warqadda codbixinta farta waawayn ku qoran**

→ **Codso caawimaad**

Yaa iga caawin kara inaan dhiibto codkayga?

→ **Qof walba marka laga reebo cida aad u shaqaynayso mise kuwa aad shuraakada tihiin**

Waxaad caawimaad ka heli kartaa asxaab, xubin ka tirsan qoyska mise dad kale oo aad ku kalsoontahay. Si waafaqsan sharciga Oregon kama heli kartid caawimaad cida aad u shaqaynayso mise kuwa aad shuraako tihiin.

→ **Kooxda Bixisa Adeegga Caawimaada Codbixinta ee Degmada**

Khasab ma ahan inaad caawimaad weydiisato qof aad taqaan. Kooxda Bixisa Adeegga Caawimaada Codbixinta ee Degmada ayaa heegan u ah inay kaa caawiyaan inaad si gaar ah oo madax-bannaan u dhiibato codkaaga.

Kawaran haddii aan saxiixi karin boqshada aan ku celinayo warqaddayda codbixinta?

→ **Waxaad isticmaali kartaa saxiixa tiimbaraha ama waxyaabo kale si ay u matalaan saxiixaaga**



Waa inaad buuxisaa foomka qiraalka saxiixa tiimbaraha iyadoo weheliso kaarka diiwaangelinta codbixiyayaasha ka hor intaadan isticmaalin tiimbaraha ama calaamadda si aad u saxiixdo baqshadda codbixintaada.

Waa kuwee ilo-xogeedyada kale ee la heli karo?

→ **Buugga Codbixiyaasha ee laga Adeegsado Gobolka oo dhan**

Waxaa laga heli karaa isagoo maqal ah mise qoraal barta oregonvotes.gov.



Ogow xuquuqdaada

Waxaad xaq u leedahay inaad **vote!**

Haddii aad tahay muwaadin Ameerikaan ah, ku dhaqan gobolka Oregon, jirto 18 sano isla markaana aad isku diwaan gelisay inaad codeyso.

- **Waxaad xaq u leedahay** inaad si asturnaan ku dheehan codkaaga u dhiibato Uma baahnid inaad dadka kale u sheegto sidaad u codeysay.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad hesho “warqadda codbixinta ku meel gaarka ah”, xitaa haddii lagu dhaho ma tihid qof isdiiwangeliyey si uu u codeeyo.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad hesho warqadda codbixinta oo cusub haddii aad khalad sameyso.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad u codeyso qofka aad rabto. Waxaad warqadda ku qori kartaa magaca qof kale haddii aadan jeclayn doorashooyinka ku yaal warqadda codbixintaada.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad u codeyso “yes(haa)” ama “no(maya)” macluumaad walba oo ku xusan warqaddaada codbixinta.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad meelaha qaar aadan buuxinin. Doorashooyinka aad doorato ayaa la xisaabin doonaa.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad isticmaasho nidaam codbixin dhammaan Doorashooyinka Federaalka ah oo u sahlaya dadka naafada ah inay si asturnaan ku dheehan isla markaana leh madaxbannaani u codeeyaan, si la mid ah dadka kale.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad ogaato haddii warqaddaada codbixinta oo ay ku jirto “warqadda codbixinta ku meel gaarka ah” la aqbalay si loo tiriyo.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad gudbiso cabasho haddii aad u maleyso in xuquuqdaada codeynta la diiday.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad codeyso ama aad codkaaga dhiibto haddii aad safka ku jirto marka ay saacaddu tahay 8 pm Maalinta Doorashada.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad ogaato haddii aad diiwaangashan tahay si aad u bixiso codkaaga.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad doorato haddii aad rabto ama aadan rabin inaad iska diiwaangeliso xubin ka tirsan xisbi siyaasadeed.

- **Waxaa xaq u leedahay** inaad isticmaasho saxiixaha tiimbaraha mise calaamado kale balse waa inaad marka hore buuxisaa foom. Cid kale kuuma saxiixi karto.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad caawimaad ka codsato shaqaalaha doorashooyinka ama asxaab ama xubin qoyskaaga ka tirsan. Waxaa jira dad qaar oo aan kaa caawin karin codbixinta, tusaale ahaan maamulahaaga shaqada ama urur shaqaale oo ka tirsantahay.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad codeysid xitaa haddii aadan haysan guri ama hoy joogto ah.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad codeyso haddii lagugu xukumay dambi culus balse lagaa sii daayay xabsiga, xitaa haddii aad bannaanka ku joogtid dammaanad ama sii-dayn shuruudaysan.
- **Waxaad xaq u leedahay** inaad codeyso xitaa haddii aad leedahay wali ama aad u baahan tahay caawimaad ku aadan akhrinta ama buuxinta warqaddaada codbixinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh



1 866 673 8683
se habla español

TTY

1 800 735 2900
kuwa qaba baahiyaha maqalka

(Xeerka Dastuurka gobolka Oregon, Qodobbada 2 iyo 3; Farqadaha ORS 137, 246, 247, iyo 254; Buug-gacmeedka Ku bixinta Codka Boostada; Sharciga Caawinta Mareykanka ee Doorashada 2002; OAR 165-001-0090 iyo 165-007-0030)



Xogta Musharaxa & Aftida

Musharrixiinta

Xeerka gobolka Oregon (ORS 254.155) wuxuu uga baahan yahay Xoghayaha Gobolka inuu sameeyo hab aan kala sooc lahayn oo xuruufta alifbeetada ah si loo go'aamiyo sida magacyada musharrixiinta uga soo muuqan doonaan warqadda codbixinta.

Xarfaha **Doorashada Xisbiga ee 2026** waa:

G, A, K, I, O, B, C, H, D, V, M, N, P, L, J, X, Z, S, R, E, W, F, Q, Y, U, T

Bayaanada musharrixiinta ee ku jira buug waxaa loo kala saaraa nooca xafiiska iyo jagada, waxaana loo sii habeeyaa isla nidaamka aan kala sooca lahayn ee magacyada musharrixiinta lagu daabici doono warqadda codbixinta. Joornaalka Doorashada xisbiga, bayaannada musharrixiinta xisbiga haysta waxaa intaa kadib loo kala saara xisbiyada siyaasadeed.

Bayaannada waxaa loo habeyaa qaabka soo socda:

- Musharrixiinta Dimuqraadiga (Democratic) ah sida ay ugu kala horeeyaan warqadda codbixinta
- Musharrixiinta Xisbiga Jamhuuriga (Republican) ah sida ay ugu kala horeeyaan warqadda codbixinta
- musharrixiinta aan lahayn xisbi sida ay ugu kala horeeyaan warqadda codbixinta

Musharrixiintu waxay bixiyaan khidmad, ama waxay soo gudbiyaan saxiixyo halkii ay ka bixin lahaayeen khidmadda, si ay uga muuqdaan buugga Codbixiyayaasha ee Gobolka. Macluumaadka sharcigu u baahan yahay—oo ku saabsan shaqada, waayo-aragnimada shaqada, waxbarashada iyo xilalka dowladeed ee hore - musharax walba wuxuu u ansixiyey inay tahay mid run ah.

Qodobada

Aftiyada waa isbeddello la soo jeediyay oo lagu sameynayo Dastuurka Oregon ama sharciyada gobolka. Aftida ku jirta Joornaalka Codbixiyaha ee la turjumay, waxaad ka heli doontaa macluumaadka soo socda:

1. Sharaxaada Codbixinta;
2. Qiyaasta Saamaynta Dhaqaalaha;
3. Bayaanka Sharaxaada ah; iyo
4. Doodaha la turjumay ee ay soo gudbiyeen taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeeda aftida, haddii ay jiraan.

Qoraalka dhammeystiran ee aftida la soo jeediyay waxa kaliya laga heli karaa Joornaalka Codbixiyaha ee Ingiriisiga.

Sharaxaada Codbixinta

Mawduuca warqadda codbixinta waxaa diyaariya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxaana loo qaybshaa dhinacyada daneynaya si ay uga dhiibtaan faallooyin dadweyne. Mar haddii la eego faallooyinka lasoo gudbiyay, mawduuca warqadda codbixinta waxaa ansixiyaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Mawduucan warqadda codbixinta ee la ansixiyey waxaa laga qaadan karaa racfaan waxaana ka dhallan kara in ay beddesho Maxkamadda Sare ee gobolka Oregon

Qiyaasta Saamaynta Dhaqaalaha

Guddiga gaar ah oo ka kooban xildhibaano ayaa diyaariyay Bayaanka Saamaynta Maaliyadeed ee Aftida 120. Magacaabista guddiga si waafaqsan SB 1599 (2026).

Qoraalka Aftida oo dhammaystiran

Tani waxay bixisaa isbeddellada dhabta ah ee aftidu ku sameyn doonto Dastuurka Oregon ama sharciyada gobolka. Qoraalka dhammeystiran ee aftida la soo jeediyay waxa kaliya laga heli karaa Joornaalka Codbixiyaha ee Ingiriisiga.

Bayaanka Sharaxaada ah

Guddiga gaar ah oo ka kooban xildhibaano ayaa diyaariyay Bayaanka Sharaxaada ee Aftida 120. Magacaabista guddiga si waafaqsan SB 1599 (2026).

Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Xubnaha Guddiga Codbixinta ee Deegaanka

Xubnaha Guddiga Codbixinta ee Deegaanka (Precinct Committeepersons, PCPs) waxay u ololeyaan diiwaangelinta codbixiyeyaasha, ka qaybqaataan go'aanada rasmiga ah ee xisbigooda, doortaan Hogaanka Xisbi ee degmada, waxayna magacaabaan Xildhibaanada Gobolka ama Senatarada Gobolka marka mid ka mid ah xafiisyadaas uu banaan noqdo.

PCP-yada waxaa loo oggol yahay kaliya xisbiyada siyaasadeed ee waaweyn. Xisbiga Dimuqraadiga (Democratic) ah ee gobolka Oregon iyo Xisbiga Jamhuuriga (Republican) ee Oregon labaduba waxay doorteen inay xubno u doortaan PCPs.

Degmo kasta waxaa loo qoondeeyay tiro PCP ah iyadoo lagu saleynayo tirada

codbixiyeyaasha diiwaangashan ee ku sugan degmada. Shakhsiyaadka waxay fayl gareyn karaan (ama u adeegi karaan) hal degmo markiiba. Si kastaba ha ahaatee, musharraxiinta PCP waxay dooran karaan haddii ay rabaan inay iska diiwaangeliyaan inay ka shaqeeyaan xaafadda ay ku nool yihiin ama xaafad u dhow oo ka tirsan isla degmada iyo isla deegaan matalaada gobolka sida xaafadda uu musharraxu ku nool yahay.

Macluumaad dheeraad ah ka hel barta oregonvotes.gov.

Afeef

Macluumaadka lagu bixiyay bayaannada ama doodaha musharraxiinta ama qof taageeraya mise diidan afti aysan xaqiijijin ansaxnaashihiisa Xoghayaha Gobolka

Musharraxiintu waxay dooran karaan inaysan gudbin bayaan ku saabsan Joornaalka Codbixiyaha.

Liiska dhammeystiran ee musharraxiinta heerka federaal iyo kuwa gobolka ee isu diiwaangeliyay Doorashada Xisbiga ee qabsoomi doonto Maajo 19, 2026, waxa lagu daabacay Joornaalka Codbixiyaha Gobolka ee af-Ingiriisiga ah ee uu soo saaray Xoghayaha Gobolka. Musharraxiinta degmada iyo kuwa dowladaha waxay ku qoran yihiin Joornaalka Codbixiyaha Gobolka ee af-Ingiriisiga ah haddii xilalkaas ay u qalmaan in lagu soo daabaco joornaalka. Warqadda codbixinta ee aad hesho waxaa ku jiri kara musharraxiin iyo aftiyo maxalli ah oo aan ku xusnayn joornaalkan.



Musharraxiinta laguma qasbo inay soo gudbiyaan bayaannada joornaalka codbixiyaha.

Bayaannada iyo doodaha aftiyada waxaa lagu daabacay sida loo soo gudbiyey.

Xoghayaha Gobolka ma xaqiijiyo macluumaadka ay musharraxiintu soo gudbiyeen, mana tiriyo dadka soo gudbiyey doodaha. Macluumaad aan sax ahayn ama khaldan lama saxo.

Macluumaadka Diiwaangelinta Codbixiyaha

Yaa isku diiwaan gelin kara inuu codeeyo?

Si aad isku diiwaangeliso waa inaad:

- Ahaataa Muwaadin Ameerikaan ah
- Degan tahay gobolka Oregon
- Ugu yaraan jirtaa 16 sanno

Haddii aadan weli gaarin 18 sano, ma heli doontid warqadda codbixinta ka sokow inay doorashada dhacdo taariikh ku beegan ama ka dib dhalashadaada aad 18 jirsanayso.

Sidee ayaan iskugu diiwaan gelin karaa codbixinta?

Isku diiwaan gelinta Codbixinta

- Barta onlaynka ah oregonvotes.gov/register
- Adigoo boostada uga soo diraya kaarka isdiiwaangelinta oo la buuxiyey xafiiska doorashooyinka degmadaada.
- Adigoo si shaqsi ahaan ah uga buuxinaya kaarka isdiiwaangelinta [xafiiska doorashooyinka degmad](#), Xafiiska Xoghayaha Gobolka, iyo qaar ka mid ah hay'adaha gobolka sida DMV.

Miyaan u baahanahay inaan cusbooneysiyo isdiiwaangelintayda?

Cusboonaysii diiwaangelintaada haddii aad guurtay, aad beddeshay magacaaga, saxiixaaga ama cinwaanka boostada, ama aad rabto inaad beddesho ama aad doorato xisbi siyaasadeed.

Waxaad macluumaadka cusub ku bixin kartaa qaab onlayn adigoo booqanaya barta oregonvotes.gov/myvote ama adigoo buuxinaya isla markaana u soo celinaya kaarka diiwaangelinta codbixiyayaasha sarkaalka doorashooyinka degmadaada.

Miyaan u baahanahay inaan bixiyo kaar Aqoonsi (ID)?

Waa inaad bixisaa lambarkaaga aqoonsiga, Ruqsadda dal ku-joogga ah ama Shatiga Darawalnimada ee gobolka Oregon oo shaqaynaya haddii aad heysato midkooda.

Haddii aadan haysan aqoonsi ay bixisay gobolka Oregon oo shaqaynaya, nala wadaag afarta jifir ee ugu dambeeya lambarkaaga Sooshal Sekuuritiga.

Haddii aadan haysan ID-kaarka aqoonsiga ee gobolka Oregon ama lambarka Sooshal Sekuuritiga oo shaqaynaya waxaad ka heli kartaa liiska aqoonsiga kale ee la aqbali karo qaab onlayn ah barta oregonvotes.gov.

Waa maxay waqtiga kama dambaysta ah ee isdiiwaangelinta?

Si aad u codeyso Doorashada Xisbiga ee dhici doonta **Maajo 19, 2026**, kaarkaaga isdiiwaangelinta ee aad buuxisay waa inuu ahaadaa:

- mid ku tiimbaraysan Talaado, **Abriil 28**; mise
- mid aad geysay [xafiiska doorashooyinka degmada](#), mise aad u dhiibtay hay'adda diiwaangelinta codbixiyaasha (sida, DMV) ugu dambayn Talaado, **Abriil 28**.

Haddii aad iska diiwaangeliso inaad ku codeyso qaab onlayn ah, isdiiwaangelintaada waa in la soo gudbiyaa 11:59 habeenimo **Abriil 28**.

Ma inaan doortaa xisbi siyaasadeed?

Maya. Haddii aadan dooran xisbi siyaasadeed, waxaad wali heli doontaa warqadda codbixinta doorasho walba oo aad xaq u leedahay inaad codeyso, sida Doorashada Xisbiga. Yeelkadeeda, warqaddaada codbixinta waxay kaliya ka koobnaan doontaa xilalka aan xisbi ku xirnayn iyo arrimaha aftida, waa haddii loo baahdo. Dhammaan xafiisyada ayaa ka soo muuqan doona warqaddaada codbixinta ee Doorashada Guud.

Barnaamijka Asturidda Ciwaanka

Barnaamijka Asturidda Cinwaanka (Address Confidentiality Program, ACP) wuxuu siyaa dadka doorashada ka qaybqaadanaya cinwaan sharci oo beddel u ah midkooda iyo adeeg soo gudbinta boostooyinka. Dadka ka badbaaday rabshadaha qoyska, tacaddiyada galmada, daandansi, ama ka ganacsiga dadka waxaa la siiyaa cinwaan beddel ah oo ay ku isticmaalaan diiwaannada dadweynaha halkii ay ka isticmaali lahaayeen cinwaankooda dhabta ah.

Shakhsiyaadka ay badqabkooda shakhsiyeed ama midka qoyskoodu khatar geli karto haddii cinwaankooda gurigu laga dalacan karo diiwaanada dadweynaha ee la shaaciyey waxay iska diiwaan gelin karaan inay codeeyaan iyagoo wata ilaalin asturnaan xogeed iyagoo codsanaya Barnaamijka Asturidda Cinwaanka (Address Confidentiality Program, ACP).

Si aad u codsato Barnaamijka Asturidda Cinwaanka, waa inaad la shaqeysaa u doodaha dhibanaha oo uu Xeer Ilaaliyaha Guud u magacaabay Kaaliyaha Codsiga.

Buug-yaraha Codbixiyeyaasha ee Oregon oo ku qoran Af-Soomaali

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u hesho Kaaliyaha Codsiga ee kuu dhow, wac **888-559-9090** ama booqo <https://www.doj.state.or.us/acp>.

Ka qaybgalka ACP keligiis ma dammaanad qaadayso qofna badqabkiisa. Shaqaalaha ACP ma bixiyaan qiimeyn khatareed ama qorsheyn badqab mana loo oggola inay bixiyaan talo sharci.



Si aad isu diiwaangeliso codbixinta ama aad u cusboonaysiiso diiwaangelintaada, ku soo celi Kaarka Diiwaangelinta Codbixiyaha qaab boosto ah, geey [Xafiiska Doorashooyinka Degmadaada](#), ama isticmaal adeegyada diiwaangelinta codbixiyaha ee laga heli karo qaab onlayn ah barta: oregonvotes.gov/register.

Musharaxiinta xisbi u gaar ah

Xildhibaanka Aqalka Sare ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Wakiilka Degmada 1aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.



Wakiilka Degmada 2aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Wakiilka Degmada 3aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.



Wakiilka Degmada 4aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.



Wakiilka Degmada 5aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.



Wakiilka Degmada 6aad ee Maraykanka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.



Gudoomiyaha Gobalka

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Musharaxiinta xisbi u gaar ah

Gudoomiyaha Wakaaladda Shaqada iyo Warshadaha ee

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Garsooraha Maxkamada Sare ee, Shaqada 4

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Garsooraha Maxkamadda Racfaanka, Shaqada 1

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Garsooraha Maxkamada Racfaanka, Shaqada 9

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Garsooraha Maxkamada Racfaanka, Shaqada 12

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Garsooraha Maxkamada Racfaanka, Shaqada 13

Sida ku cad ORS 251.170, musharaxiinta heer gobol iyo heer federaal waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda bayaankooda musharaxnimo. Dhammaan musharaxyada lagama rabo inay soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan bayaanada musharaxiinta oo af Ingiriisi ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.

Awaamirta Aftida qaran ee ka dhashay Codsiga ay Shacabka Gudbiyeen

Qodobka Loo Codeynaayo 120

Waxay kordhinaysaa canshuurta shidaalka, khidmadaha diiwaangelinta iyo lahaanshaha gaadiidka ee loogu talagalay waddooyinka, iyo canshuur lagu soo rogo mushaharka si loo maalgeliyo adeegyada gaadiidka dadweynaha.

Natiijada ka dhalanaysa haddii codka “Yes” (Haa) la ansixiyo:

Haddii codka “Yes” (Haa) la ansixiyo waxay sare u qaadaysaa canshuurta shidaalka, khidmadaha qaarkood ee diiwaangelinta iyo lahaanshaha gaadiidka si loogu maalgeliyo dhismaha, dayactirka iyo hagaajinta waddooyinka heer gobol iyo deegaan; sidoo kale waxay kordhinaysaa canshuurta lagu soo rogo mushaharka si loo taageero adeegyada gaadiidka dadweynaha.

Natiijada ka dhalanaysa haddii codka “No” (Maya) la ansixiyo:

Haddii codka “No” (Maya) waxay halkeeda ku heynaysaa canshuurta shidaalka ee hadda la qaado 40 senti halkii gallon, wuxuuna diidayaa kordhinta khidmadaha diiwaangelinta iyo lahaanshaha gaadiidka, iyo canshuurta lagu soo rogo mushaharka dadweynaha si loo taageero adeegyada gaadiidka dadweynaha.

DULUCDA/GUUDMARKA:

Qodobka Loo Codeynaayo wuxuu kordhinayaa canshuurta shidaalka iyo isticmaalka shidaalka ee gaadiidka waxayna ka dhigaysaa 6 senti halkii gallon. Sidoo kale waxay sare u qaadaysaa khidmadaha sannadlaha ah ee lagu soo rogo diiwaangelinta gaadiidka iyadoo loo eegayo nooca gaadiidka; \$43 ilaa \$85 gaadiidka ay raacaan dadweynaha; \$63 ilaa \$105 taraagyada qaada adeegyada guriga iyo kuwa fudud, gaadiidka leh xawaaraha yar iyo gaadiidka korontada ku shaqeeya isla markaana leh xawaaraha dhexdhexaadka ah, iyo \$44 ilaa \$86 mootooyinka yaryar iyo kuwa caadiga ah. Qodobka Loo Codeynaayo wuxuu sarre u qaadaya khidmadaha hadda laga qaado mulkiyidda gawaaridda ay racaan dadweynaha oo ah \$77 waxayna ka dhigaysaa \$216. Lacagaha laga helo kordhinta canshuuraha/khidmadaha ayaa loo qaybiyay/qaadayey: Boqolkiiba 50% Waaxda Gaadiidka, boqolkiiba 30% degmadda, boqolkiiba 20% magaalooyinka. Lacagaha waxaa loo isticmaali doonaa dhismaha, dayactirka, iyo hagaajinta waddooyinka heer gobol iyo heer deegaan. Qodobka Loo Codeynaayo wuxuu sarre u qaadaya canshuurta laga qaado mushaharka laga helo adeegyada gaadiidka dadweynaha iyadoo ku rogaysa toban meelood labo meel boqolkiiba hal; waxay khuseysaa mushaharka shaqaalaha ku dhaqan gobolka, iyadoon loo eegaynin meesha uu ka shaqaynaayo, mise shaqaalaha aan gobolka ku dhaqanayn ee ka shaqeeya adeegyo lagu qabto gobolka.

Qiyaasta Saamaynta Dhaqaalaha



Buug-yaraha Codbixiyeyaasha ee Oregon oo ku qoran Af-Soomaali

In loo qaado cod “Yes (Haa)” ah aftida waxa ka dhalan kara waxyaabahan soo socda ee Qodobka Loo Codeynaayo.

Sanad maaliyadeedka 2027 ilaa 2035, canshuuraha shidaalka ayaa la filayaa inay sare u kacaan celcelis ahaan \$104 milyan sanadkii, dakhliga khidmadaha diiwaangelinta ayaa kordhi doona celcelis ahaan \$157 milyan sanadkii, iyo dakhliga khidmadaha lahaanshaha gaadiidka ayaa kordhi doona celcelis ahaan \$130 milyan sanadkii. Dakhliga oo kordha wuxuu keenaa in loo qoondeeyo lacago dheeraad ah oo celcelis ahaan dhan sanadkiiba \$196 milyan gobolka, \$117 milyan degmooyinka, iyo \$78 milyan magaalooyinka.

Lacagaha canshuurta mushaharka iyo kharashaadka adeegyada gaadiidka dadweynaha ayaa sare u kici doona isla markaana gaari doona \$118 milyan sanad maaliyadeedka 2027 iyo \$124 milyan sanad maaliyadeedka 2028.

Xubnaha Guddida

Xil-dhibaan Kayse Jama, Ahna xubin ka tirsan guddiga
Wakiil David Gomberg, Ahna xubin ka tirsan guddiga
Xil-dhibaan Khanh Pham
Xil-dhibaan Bruce Starr*
Wakiil Shelly Boshart Davis*
Wakiil Ben Bowman
Wakiil Willy Chotzen
Wakiil Lucetta Elmer*
* Diidmooyinka xubnaha (ma waafaqsana bayaanka sharaxaada ah)

Waxaa magacaabay:

Madaxa Aqalka Sare
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Madaxa Aqalka Sare
Madaxa Aqalka Sare
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada

(Qiyaasta saamaynta miisaaniyadda waxa bixiyay guddida sare ku xusan si waafaqsan qodobka SB 1599.)

Bayaanka Sharaxaada ah

Qodobka Loo Codeynaayo 120 wuxuu wax ka beddelaysaa xeerarka gobolka Oregon si uu u kordhiyo canshuurta shidaalka, khidmadaha diiwaangelinta gaadiidka iyo khidmadaha lahaanshaha, isla markaana si ku-meel-gaar ah u kordhiyo canshuurta mushaharka ee loogu talagalay gaadiidka dadweynaha.

Sida uu dhigayo sharciga hadda jira iyo Dastuurka gobolka Oregon, canshuuraha shidaalka iyo khidmadaha diiwaangelinta gaadiidka waxaa loo qaadaa si loogu maalgeliyo jidadka waaweyn, buundooyinka, iyo meelaha nasashada ee ku yaalla hareeraha waddooyinka ee gobolka Oregon. Canshuuraha mushaharka, nooliga, iyo ilaha kale ee dhaqaale ayaa loo isticmaalaa maalgelinta adeegyada gaadiidka dadweynaha. Wakhti xaadirkan, canshuur laga qaado mushaharka ayaa la soo rogay oo dhan toban meelood meel ee boqolkiiba hal mushaharka. Canshuurta mushaharka

waxaa laga qadaa mushaharka shaqaalaha ku nool gobolka, iyada oo aan loo eegin meesha uu shaqaalaha ka shaqaynaayo, iyo sidoo kale shaqaalaha aan gobolkan ku noolayn balse ka shaqynaya gudaha gobolka. Dakhliga laga helo canshuurta mushaharka waxaa la siiyaa hay'adaha gaadiidka dadweynaha ee ka hawl gala guud ahaan gobolka si ay u bixiyaan adeegyada gaadiidka dadweynaha, sida adeegga basaska.

Golaha Shacabka ayaa fadhi gaar ah ku ansixiyay Sharciga Golaha 3991 sannadka 2025. Waxaa ku jira waxyaabo kale oo aan halkan lagu soo koobi karin, sharcigu waxa uu sarre u qaadayaa canshuuraha shidaalka ee gaadiidka iyo qaar ka mid ah khidmadaha diiwaangelinta iyo lahaanshaha gaadiidka. Sharciga Golaha 3991 wuxuu waajibinayaa in milkiilayaasha gaadiidka ku shaqeeya korontada iyo kuwa isku-dhafka ah ay bixiyaan khidmad go'an ama khidmad ku saleysan maylalka ay gaadiidkoodu jaraan; wuxuuna sidoo kale soo rogayaa tallaabooyin isla xisaabtan oo dheeraad ah oo loogu talagalay Waaxda Gaadiidka; kuwaas oo meesha ka saaraya qaybo ka mid ah sharciga hadda jira ee ku saabsan khidmadaha isticmaalka waddooyinka ee mashaariicda qaar ee waddooyinka; wuxuuna fududeynayaa nidaamka gobolka ee "miisaanka-maylka" ee canshuurta laga qaado taraagyada waaweyn. Sharcigu wuxuu dhigaya in lacagta cusub ee ka soo baxda kordhinta canshuurta shidaalka, khidmadaha diiwaangelinta, iyo khidmadaha lahaanshaha gaadiidka loo qaybiyo Waaxda Gaadiidka, degmooyinka, iyo magaalooyinka. Qaasatan, magaalooyinka iyo degmooyinka ku nool bulsho kooban waxay heli doonaan lacag ka badan tan ay hadda helaan, halka hay'adda gobolka ee mas'uulka ka ah inta badan meelaha nasashada ee ku yaalla hareeraha waddooyinka ay heli doonto lacag dheeraad ah si loo hagaajiyo loona dayactiro meelaha nasashada ee ku teedsan jidadka waaweyn.

Dadkii codsaday aftida waxay ururiyeen saxiixyo ku filan si ay u dhaqan galiyaan xaqa aftida, taasoo u oggolaanaysa cod-bixiyeyaasha inay ansixiyaan ama diidaan kordhinta canshuuraha shidaalka, khidmadaha diiwaangelinta iyo lahaanshaha gaadiidka, iyo canshuuraha mushaharka, sida ku cad Qodobka Loo Codeynaayo 120. Qodobka Loo Codeynaayo 120 wuxuu sarre u qaadayaa canshuurta shidaalka ee gobolka isagoo ka dhigaaya 46 senti halkii gallon, wuxuuna kordhinayaa khidmadaha diiwaangelinta gaadiidka isagoo ka dhigaaya \$42, waxaan si gaar ah loogu rogaaya gaadiidka raaca dadwaynaha, taraagyada qaada adeegyada guriga iyo kuwa fudud, gaadiidka xawaarhooda hooseeyo, mootooyinka yaryar iyo kuwa caadiga ah Qodobka Loo Codeynaayo 120 wuxuu sarre u qaadayaa khidmadaha lahaanshaha gaadiidka ay racaan dadweynaha \$139

Qodobka Loo Codeynaayo wuxuu sidoo kale si ku-meel-gaar ah u kordhinaysaa canshuurta mushaharka ee loogu talagalay gaadiidka dadweynaha. Hay'adaha gaadiidka dadweynaha waxay heli doonaan lacago dheeraad ah oo ka timaadda kordhinta ku-meel-gaarka ah ee canshuurta mushaharka. Qodobka Loo Codeynaayo wuxuu dhigaya in heerka canshuurta mushaharka uu kordho toban meelood labo meel

Buug-yaraha Codbixiyeyaasha ee Oregon oo ku qoran Af-Soomaali

boqolkiiba hal ilaa laga garaayo Janaayo 1, 2028. Laga bilaabo Janaayo 1, 2028, heerka canshuurta mushaharka wuxuu ku noqon doonaa toban meelood meel boqolkiiba hal.

Haddii cod-bixiyeyaashu aysan ansixin Qodobka Loo Codeynaayo 120, canshuuraha shidaalka, khidmadaha diiwaangelinta, iyo khidmadaha lahaanshaha gaadiidka waxba lagama beddeli doono Sidoo kale, canshuurta mushaharka ee loogu talagalay adeegyada gaadiidka dadweynaha wax isbeddel ah laguma soo rogi doono.

Xubnaha Guddida

Xil-dhibaan Kayse Jama, Ahna xubin ka tirsan guddiga
Wakiil David Gomberg, Ahna xubin ka tirsan guddiga
Xil-dhibaan Khanh Pham
Xil-dhibaan Bruce Starr*
Wakiil Shelly Boshart Davis*
Wakiil Ben Bowman
Wakiil Willy Chotzen
Wakiil Lucetta Elmer*

Waxaa magacaabay:

Madaxa Aqalka Sare
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Madaxa Aqalka Sare
Madaxa Aqalka Sare
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada
Afhayeenka Golaha Wakiilada

* Diidmooyinka xubnaha (ma waafaqsana bayaanka sharaxaada ah)

(Guddidan sare ku xusan waxa loo magacaabay si ay u bixiyaan sharaxaad dhexdhexaad ah oo ku saabsan Qodobka Loo Codeynaayo ee codbixinta, si waafaqsan SB 1599.)

Sida ku cad ORS 251.170, ciddii soo gudbinaysa dood taageeraysa ama ku lid ah tallaabada gobolka waxay ikhtihaar u leeyihiin inay soo gudbiyaan turjumaadda doodooda. Cidwalba oo wax soo gudbisa ma soo gudbiyaan turjumaado. Dhammaan doodaha af Ingiriisiga ku qoran waxa laga helayaa oregonvotes.gov/VotersPamphlet.